

Waaxda Caafimaadka
Gudiga Hab-dhaqanka Caafimaad
P.O. Box 70
Burlington, VT 05402-0070
800-745-7371

OGOLAANSHAHA SHAACINTA DIIWAANADA CAAFIIMAAD

QOFKA AY KHUSAYSO:

SIDAAS AWGEED WAXAAN HALKAN IDIN KU OGOLAANAYAA la siiyo Waaxda Caafimaadka ee Vermont, Guddiga Dhaqanka Caafimaadka, iyo/ama wakiilkeeda loo xilsaaray, iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, dhamaan diiwaannada caafimaadka iyo dhamaan macluumaadka, iyada oo aan waxba lagala harin, wax kasta oo aad haysid ama gacanta kuugu jira ee ani i khuseey, hadday tahay hadal ama qoraalba (oo ay ku jiraan diiwaannada ay ku siiyeen dhakhaatiir kale ama hay'adaha daryeelka caafimaadka) ee la xiriira xaalad kasta oo jir ahaaneed, dhimir ahaaneed, maskax ahaaneed ama shucuur ahaaneed ama dhaawac ama cudur laga yaabo inaad adeegyo uga fidsay.

Kaliya marka la eego ogolaanshahan shaacinta Waaxda Caafimaadka ee Vermont, Guddiga Hab-dhaqanka Caafimaadka, iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo in ujeeddo kale aysan jirin, waxaan halkan si cad uga DHAAFAY qarsoodinimada iyo/ama wixii mudnaan ah ama xasaanad ah oo uu siiyay macluumaadkan sharciga Dawladda Dawlada dhexe, oo ay ku jiraan agabka uu daboolay 42 CFR, Qaybta 2, iyo inaan wax dhibaato u gaysanin shaacinta la mid ah ee Waaxda Caafimaadka ee Vermont, Guddiga hab-dhaqanka Caafimaadka, iyadoo la raacayo codsigeyga, si loo qiimeeyo dhinacyada qaarkood ee daryeelkayga caafimaadkayga.

OGOLAANSHAHAN Waa lagala noqon karaa wakhti kasta marka laga reebo in aad horeba u qaaday talaabo aad ugu tiirsan tahay. Haddii aan hore loogaa laabanin, ogolaanshahani wuxuu dhamaan doonaa marka talaabada ugu dambeysa, oo ay ku jirto go'aaminta garsoor ahaaneed, talaabo kasta oo ay qaadaan Gudiga Hab-dhaqanka Caafimaadka ee la xiriira macluumaadkan, ama, haddii aan talaabadaas la qaadin, waxay joogsan doontaa 365 maalmood laga bilaabo taariikhda maalintaas.

WAXAA SIDOO KALE LAGUU OGOLAADAY inaad kusoo wargaliso macluumaadka, hadal ahaan ama qoraal ahaan, si toos ah Waaxda Caafimaadka ee Vermont, Golaha hab-dhaqanka caafimaadka, ama wakiilkeeda la magacaabay, iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud, si joogto ah ilaa ogolaanshahani wakhtigiisa dhamaado ama laga noqdo.

NUQUL DAABACAN OO AH XAQIIJINTA OGOLAANSHAN WAA IN LA BIXIYAA.

Magaca (oo buuxa)

Taariikhda Dhalashada

Cinwaanka Deegaanka

Cinwaanka Deegaanka

Magalaada/Gobalka/Koodhka Boostada

Saxeexa

Taariikhda